



HAB CUSUB EE QIIMEYNTA BADQABKA CUNTADA

Januweri 2017

Waa maxay sababta calaamadaha ogeysiiska loogu soo qoray?

Calaamadaha ogeysiiska waxay siinayaan macaamiisha war bixin ku saabsan sida wacan ee maqaaxidaha u taabageliyaan badqabka cuntada Bulshada dagan King County waxay weydiyeen macluumaad dheeraad ku saabsan barista maqaaxidaha. calaamadaha ogeysiiska ku qoran qiimeynta ayaa lagu soo dhejin doonaa maqaaxidaha.

Qiimeynta cusub:



BAAHIDA IN LA HORUMARIYO

Maqaaxida waxa xiray ama Hay'ada Caafimaadka Seattle iyo King County sanadkii hore dhexdiis ama waxa loo baahday in maqaaxida baaritaano badan soo maro si ay u hagaajiso badqabka cunadeeda.

Qaybtani kuma jirto kuwii ka mid ahaa qiimeynta qaloocan.



OKAY

Maqaaxida waxay soo martay:

WAX BADAN meel ka dhacyo midabka cas leh afartii baaris ugu danbeesay.

10% maqaaxidaha xaafad waliba ayaa waxay kala lahaayeen qiimeyntani.



FIICAN

Maqaaxida waxay soo martay:

INN meel ka dhacyo midabka cas leh afartii baaris ugu danbeesay.

40% maqaaxidaha xaafad waliba ayaa waxay kala lahaayeen qiimeyntani.



HEER-SARE

Maqaaxida waxay soo martay:

MAY AMA INN YAR meel ka dhacyo midabka cas leh afartii baaris ugu danbeesay.

50% maqaaxidaha xaafad waliba ayaa waxay kala lahaayeen qiimeyntani.

Hadba goorma yaa cuntadayda qiimeynteeda la isoo wargalin?

Baarista badqabka cuntada waxaa la wargeliyaa marwalba oo barista caadiga ah uu dhaco ka dib. Maqaaxidaha ku yaal King County si gaar ah waxay leeyihiin labo baaris sanadkiiba iyo mid aan la xisaabin oo booqasho aqooneed ah.

Sidee u fiicneyn karaa badqabka cuntada?

Badqabka wanaagsan ee cunnada waxa uu reebaa cudurada cuntada laga qaado. Eeg dhanka kale warbixin dheeraad ah.

Sidee loo xisaabiyaa qiimeynta badqabka cunnada maqaaxida lagu soo qoro daaqaadaha ogeysiiska?

Qiimeynta waxa lagu xisaabiyaa isku celceliska buundooyinka tootaalka tirooyinka leh meel ka dhaca daran eel eh midabka cas ee illaa afartii baaris ugu danbeesay yeesho calaamadahaas.

Calaamadaha maqaaxi walbaa ay keento waxaa loo barbardhigaa calaamadaha ay keenaan maqaaxiyaha kale ku yaal isla eeriyaadaa.

SIDEE U FIICNEYN KARAA HAB DHAQANKA BADQABKA CUNTADEYDA OO U REEBAA CUDARADA KA DHASHAA CUNNADA?

1 Keliya waxaad shaqeyneysaa haddii aad tahay badqab ama mid caafimaad leh.



Ha shaqeyn haddii aad hunqaaceysid, shuban leedahay ama cudur faafa lagugu soo sheegay kaasoo cunada ku faafi karo.

2 Gacmaha iska meydh.

Gacmaha iska meydh intaadan howsha galin, markaad suulida ka soo baxdo kadib, markaad hilib ceyriin ah taabato ka dib, digaag ama kaluun; markaad wax nadiifiso ka dib, markaad qashinka soo daadiso ka dib, markaad diifsato, qufacdo, wejiga taabato, iwm.



3 Warqadaha jilicsan ee softiga loo yaqaan iyo saabuun dhig farxalka.

Xaqiiji in dhamaan farxalkaagu si wacan u shaqeynayaan oo ay leedahay saabuun iyo warqadaha softiga.



4 Addeegso qalabka gacanta ama glovisyo.

Cunto in la cuno oo diyaar ah markaad gacmaha la galayso adeegso glovisyada marqura la isticmaalo (waa cunto dhaqis ama in la kariyo aan gali doonin).




5 Xaqiiji in cuntada leedahay temperasharka loo baahanyahay.

Xaqiiji in cuntada halista ka imani kartaa aad ku heyso (in ka sare 135°F) (in ka hoose 41°F) marwaliba. Ha ku haynin tempasharka qolka leeyahay cunto halis ka imani karta sida (hibka, caanaha, kaluunka, cunto karsan).




6 Ku kari cuntada temperasharka saxda ah.

Ku kari cuntada temperasharka ku haboon. (Digaaga 165°F, hilibka lo'da 155°F, kaluunka, hilib, ukunta 145°F).



7 Qaboojinta cuntada kulul.

Qabooji cuntada kulul adoo isticmaalaya digsi qaab fidsan leh (aan daboolneyn, talaajada dhexdeeda 2 inji ama in ka yar).



8 Kaydinta cuntada qeyriinka ah.

Kaydinta hilibka qeyriinka meel hoose oo ka fog cunnada kale. Markaad faraha la galayso hilib qeyriin ah, kaluun digaag meelo gaar ka ah cunnada kale.



9 Nadiifi oo sifee.

Si wanaagsan u nadiifi qalabka, alaabta iyo wax yaabaha aad cunno ku isticmaaleysid oo dhami: dhaq, biyo la dhig, sifee, hawo ku qalaji.



10 Tababar sii shaqaalahaaga.

Tababar ku sii shaqaalahaaga walxaha kor ku xusan, oo dhowr habdhaqanka badqabka cunnada maalin walba.



Haddii aad u baahantahay caawinaad ama aad qabto su'aal ku saabsan sida aad saro ugu qaadi lahayd badqabka cuntadaada ama aad jeclaan lahayd jadwal booqasho aqooneed, fadlan la xiriir baarahaaga caafimaadka. Waxay u joogaan in ay ku caawiyaan in aad guuleysato.